



Hambalyo, waxaad heshay oggolaasho joogitaan!


Hadda waxaad codsan karta dib u mideynta qooyaska. Hagaha dib u mideynta qooyaska ayaa ballan kuu dhigaaya si aad uga wada hadashaan habraaca. Diyaar ayaan kuu nahay!

Waa maxay dib u mideynta qooyaska?

Dib u mideynta qooyaska waa habraac sharciyeed ka yeelaaya in aad qooyaskaada keeni karto Nederland. Nederland adeeg ay dowladda leedahay, Adeegga Socdaalka iyo Jinsiyadaa (lagu soo koobo IND) ayaa codsigaada go'aan ka gaareyso. Codsiga waxa uu quseeyaa qooyaskaada: waalidkaada iyo wiilasha iyo gabdhaha kula dhashay oo aan qaan gaarin. Waxa quseeya wiilaasha iyo gabdhaha kula dhashay oo qaan gaar ah iyo xubnaha kale oo qooyaska waxay ka qabtaa IND su'aalo iyo shuruudo dheerad ah. Soo gudbinta codsiga dib u mideynta qooyaska ma keenaayo in ay hubanti tahay in IND laga helaayo go'aan oggolaasho ah.

🕒 Muddo intee la eg ayuu qaadanayaa habraaca dib u mideynta qooyaska?

Waxa aad dooneysa in reerkaada sida ugu dhaqsida badan ay Nederland ku yimaadaan. Waad isku xiisteen taasi si fiican ayaan u fahmeynaa. Habraaca IND wakhti badan ayuu qaadanaayaa. Waa muhiim in adiga aad taasi ogaato una sheegto reerkaada. U sheeg reerkaada in ay qaadan karto labo sano inta aad jawaab IND ka heleyso, marka laga soo bilaabo taariikhda aad codsiga dib u mideynta qooyaska aad geeysatay, aan taasina la soo dedejjin karin. Xitaa Nidos aysan taasi karin.



Maxaad sii qabaneynaa inta wakhtigaa u dhexeeya?

Waa in aad aayatiinkaada ka sii hawl gasho oo aadan wax badan ka fekerin habraaca, waayoo fekerka iyo dhowrista waxay kaa sii jeedinayaan bartilmaameedka aad leedahay. Waxaad Nederland u timid in aad halkaan nololshaada ku dhiso. Nidos waa ay kula shaqeyneysaa inta habraaca uu socdo.

+ MAXAY DHABTII KA QABANEYSA NIDOS DIB U MIDEYNTA QOOYSKA?

- ✓ Nidos waxa ay codsigaada u direysaa IND.
- ✓ Nidos waxa ay koobiyaasha dokumentiyaashina u direysaa xafiiska soo tarjumaaya.
- ✓ Nidos waxay bixineysa kharashkaada dalabka wiilasha iyo gabdhaha kula dhashay oo aan qaan gaarin.
- ✓ Nidos waxa ay si joogto ah ula xiriiri doontaa IND.
- ✓ Nidos waxa ay u direysaa dokumentiyaashina assaliga ah IND si loo soo baaro.
- ✓ Nidos adiga ayeey kula soo xiriirayaan haddii akhbaar cusub soo baxdo.
- ✓ Nidos waxa ay dhigeysaa ballanta safaradda marka reerkaada fiisada qaadasho u diyaar tahay.



Maxaa reerkaada laga rabaa in ay sameeyaan, si ay Nidos idiin caawini karto?


- ✓ Reerkaada dokumentiyaasha ayeey soo ururinayaan. Dokumentigee? Taasi waxaa ka wada hadli doono adiga iyo hagahaada dib u mideynta qooyksa. Nidos waxa ay kusiin doontaa qoraal leh tusaalooyin dokumentiyada loo baahan yahay.
- ✓ Reerkaada marka hore waxa ay soo dirayaan koobiyaal dokumentiyaasha keddibna dokumentiyaasha assaliga ayeey Nederland u soo diraayaan.
- ✓ Reerkaada waxa ay kharashka dalabka ka bixinayaan wiilasha iyo gabdhaha kula dhashay oo qaan gaaray iyo xubnaha kale ee qooyksa.



Maxay Nidos aysan sameyneyn?

- ✓ Nidos ma qaadeyso mas'uuliyadda dokumentiyaasha been abuurka ah.
- ✓ Nidos kharash kama bixineyso wiilasha iyo gabdhaha kula dhashay oo qaan gaaray iyo xubnaha kale ee qooyksa.
- ✓ Nidos ma bixineyso kharashka tikidhada dullimaadka.
- ✓ Nidos wax saameyn ah kuma laha muddada sugitaanka.
- ✓ Nidos ma ka gaareyso go'aan codsigaada; go'aanka waxaa iska leh IND.

Toddobada tallabo oo dib u mideynta qooyksa



Vragen over deze brochure of over gezinshereniging?

Neem dan contact op met jouw contactpersoon van gezinshereniging of met Nidos algemeen via 0885011200 of contact@nidos.nl

@Nidos / AUG 2023 / SOM

NIDOS

jeugdbescherming voor vluchtelingen